

# Tilmaamaha Bulshada ee Macaanka Muhaajiriinta Jinsiga tirade yare ee Dadweynaha. Barnaamijyo Tusaale u ah ogaalka iyo maamulka

## Maxaa loo Sameeyay Tilmaamaha Bulshada?

Iyada oo la tixraacayo ururka macaanka ee Kanada, afartii qof ee Kanadiyaan ah midkood baa qaba macaan, ama astaamaha macaanka qaba, haddii ay xaaladu sidaa ku socoto waxay kor ugu kici doontaa sedexdii qofba hal. Dadka u dhashay koonfurta Asia, Bariga Asia, Africa iyo kuwa asalkoodu yahay Hispanic waxa sareysa halista uu ugu dhaci karo macaanku, ama macaanbay qabaan oo ay la nool yihiin. Dad badan oo ku cusub Kanada waxay ka yimaadaan wadamo maccaanku ku badan yahay. Macaanka dadkaasi waa arin ahmiyadweyn u leh caafimaadka Kanada. Barnaamijyo kooban oo macaanka ah ayaa ku aadan muhaajiriinta cusub ee bulshoyinka.

## Waa maxay u jeedada tilmaamuhu?

- In kor loo qaado wacyi gelinta ogaalka iyo maamulka macaanka bulshoyinka halistoodu sareyso.
- In loo fidiyo tusaalooyin barnaamijka macaanka ah cida rabta in ay bilowdo oo ay dhaqan galiso barnaamij macaanka ee ku haboon baahida gaarka aha ee bulshadooda
- In la wadaago guulaha la hirgaliyay.

## Ayaa loo diyaariyay tilmaamaha?

Tilmaamaha waxa loogu talagalay:


- Adeeg fidiyayaasha
- Xubnaha ka tirsan xirfadlayaasha kooxda macaanka
- La taliyayaasha dejinta
- Hogaamiy - yaasha bulshada ee la shaqeeya bulshoyinkan

## Maxaa ku jira tilmaamaha?

- Barnaamijyo goo-goosah oo ku aadan hore u ogaalka iyo maamulka macaanka.
- Barnaamijyo bar tilmaameed u ah hal bulsho ama dhawr bulshoyin oo halistooda macaanku sareyso.
- Ururada leh barnaamijyo u adeega bulshoyinkaas.
- Tijaabo dhaqan gal ah oo loo adeegsan karo tusaale

## Waa maxay nooca barnaamijyada loo dooray tilmaamahu?

- Fidin aqoonsan, xirfada iyo daryeel taa soo aqoonsan ahmiyada kala duwanida daqanka si ay u saameyso ka hor taga, dib u dhigida ama maamulka macaanka.
- In ahmiyada lagu aadiyo bulshoyinka koonfur Asian, Bariga Asian, Madowga ama Hispanic ka.



## Waa Maxay qeybah barnaamijyada ee Diwaangashan?

1. Qiimaynta halista macaanka/Baarista
2. Maamulka macaanka
3. Wacyi gelinta macaanka iyo isbedelada hab nololeed

## **Kuwee furaha u ah bahda barnaamijka macaanka?**

- Rugaha caafimaadka ee bulshada
- Dhaqamada kala duwan ama ururada bulshooyinka.
- Wakaaladaha/qaybaha fadaraalka iyo goblada
- Isbitaalada iyo rugaha caafimaadka
- Suuqyada, meelaha lagu cibaadeysto iyo jamicadaha
- Ururada Samafalka
- Dhaqan galiyayaash daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha

## **Maxaa loo abuuray barnaamijyadan?**

- Jirada macaanka oo koroday.
- Kooxaha halista u ah macaanka oo aad ugu badan dadweynaha
- Barnaamijyada macaanka ee jiraa oo fahamsaneyn ama ka hadlin dhaqamada kala duwan.
- Kanadiyanka cusub ee ay soo foodsarty dhibaato saameyn ku leh caafimaadka
- Luqad, aqoon daro caafimaad iyo dhqaalo daro
- Adeega iyo warbixin oo aan la wada heli Karin.

## **Noocyada Wax Qabadka**

### **Halista Macaanka Qiimeyn/Baritaan**

- Barnaamijyo wax barasho kooxeed ah
- Ka hadl caafimaadka oo sanadle ah
- Baaritaan xiliyada carwooyinka caafimaadka
- Rugaha caafimaadka ee hore logu ogaado
- Baaritaanka xiliyada kulanka bulshada

### **Maamulka Macaanka**

- Casharo macaanka ah oo bulshada ku saleysa
- Tababaro af gaar ah ku baxaya
- Kooxo nidaam kala duwaan oo daryeel iyo taageeroba isugu jira
- Wada shageyn qolyaha takhasuska leh iyo kuwa khibrada leh.
- Ismaamul xirfad iyo aqooneed.

### **Ogaalka Macaanka iyo isbedalka hab nololeed**

- Bandhigyo wadajira oo koox nidaam kaldawan leh.
- Jikooyin la wadaago
- Badal hab nololeed
- Nafaqo iyo jimicsi
- Casuumad baraarujinta caafimaadka ah

## **Habkee la adeegsaday ee dadka lagu gaadhey?**

- Ka qeybqalida fagaaraha iyo dhacdooyinka caafimaadka ee bar tilmaeedka u ah dadweynah halistoodu sareyso
- In la adeegsado war baahinta dadka halistoodu sareyso
- In lagu dhigo casharada ESLka
- In wada shaqeyn lalayeesho ururada dadka halistoodu sareyso, xagga baraarujinta iyo adeega
- In la diwaangeliyo madaxda bulshada, diinta iyo daneeyayaasha.
- In warbixin lagu dhaafo suuqa ,xafisyada takhaatiirta,dukaamada j iyo meelaha lgu cibaadeysto.
- Baraarujinta ,oo loo adeegsanayo (bulletins) iyo website yada
- In guri-guri loo gaadho meelaha ay degan yihiin muhaajirinta cusub iyo qoysaska dhaqaalahoodu hooseyo.



War bixin dheeri ah fadlan kala eeg CEC website: [www.ethnocultural.ca](http://www.ethnocultural.ca)

*Tilmaamahan waxa maal geliyay hey'adda caafimaadka dadweynah ee Kanada*